
# AQOONTII IYO ILBAXNIMADII SOOMAALIDA



Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo'

Taxanaha Dhaxalreeb:

[1] Jama Musse Jama, Juun 2005
Layli Robot: Makiinad iswadda oo ciyaarta Layli Goobalay
[2] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo' iyo Mohamoud H. Nugidoon, Noofember 2005
Qalabka iyo Suugaanta Qodaalka.
[3] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Diisember 2005
Mahadhadii Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal.
[4] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Jeenarweri 2006
Kumaa ah Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed: ma Carraale mise Gaarriye?
[5] Jama Musse Jama, Abriil 2007
Tirada iyo habka tirsiimo ee Afsoomaaliga.
[6] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Meey 2007
Miisaanku waa furaha kala asooridda badaha maansooyinka soomaaliyeed
[7] Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd", Juun 2007
"Dhulgariir" waa digniin culus
[8] Khaalid Jaamac Qodax, Oktoober 2007
Suugaan Xul ah iyo Abwaan Axmed Aw-geedi "Dheeraad"
Maansoyahan mudh baxay!
[9] Xasan C. Madar, Maarj 2008
Raad ka mid ah raadadkii addoonsiga.
[10] Aadam Xaaji Cali Axmed, Seebtember 2008
Bandhig-buugeedka Caalamiga ah ee Hargeysa
[11] Ayaan Maxamuud Cashuur, Oktoober 2008
Toddobaadka Fanka iyo Suugaanta Soomaalida ee Landhan
[12] Xasan C. Madar, Diisember 2008
Ruwaanda: Xasuuqii boqolka maalmood
[13] Mohamed-Rashiid Sheikh Hassan, Diisember 2008
Art and Literature: The Other Weapon for Resistance
[14] Kamaal Cabdillaahi Xuseen, Abriil 2009
Iskaddaa sonkorta oo ka gaashaamo cudurka kaadi-macaanka noociisa labaad
[15] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Noofember 2009
Aqoontii iyo ibaxnimadii Soomaalida

Taxanaha *Dhaxalreeb* waa qoraallo aan kalgal sugan lahayn oo sannadkiiba dhowr jeer kasoo baxa degelka redsea-online.com. Waxaa isku dubbarida qoraalladaas Jama Musse Jama, waxaana daabacda shirkadda buugaagta soo saarta ee Ponte Invisibile Ed. ee saldhiggeedu yahay Pisa, Italy.

Bilaash kaga soo rogo degelka www.redsea-online.com/e-books.

# AQOONTII IYO ILBAXNIMADII SOOMAALIDA

*Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo'*

hal_aqoon@yahoo.com

Qoraal uu ladhkiisu ahaa '*Soomaalidii hore iyo aqoonta maadiga ah*', (Posted on Thursday, September 24 @ 03:50:10 CD by redsea-online.com) oo uu qoray nin la yidhaa *Axmed Saleebaan Xirsi* baa runtii aad ii soo jiitey. Waxanse dareemay inuu Axmed aqoontii inoo qadhiidhay oo uu faraguudkood wax inoogu dhiibay. Sidaasi awgeed waxan damcay inaan aragtidaa kobciyo oo aan ku badhitaaro ama ku kaalo intan soo socota. Ciddii in kale haysaana ha soo dawiso illayn waa tii hore loo yidhi talo rag waa biiro idaade.

Ugu horrayn, aqoonta Soomaaliyeed kuma kaydsana suugaanta oo qudha. Ilbaxnimadii dadkeennuna ka mug weyn wax dhawr bog lagu qoro. Waxase loo baahan yahay sidii xilweyn laysaga saarilahaa ururintooda iyo sidii loo galtibixin lahaa loogana dhigilahaa wax dugsiyada lagu barto.

Haddii aan haddaba aqoontaa iyo ilbaxnimadaa wax ka taataabto, dadkeennu waxay yaqaanneen, intaan aqoonta reer galbeed inoo iman, waxyaalaha soo socda:

1. Waxay dadka Soomaaliyeed yaqaanneen in cudurrada laysku dhalo oo la kala dhaxlo, kuwaasi oo dhakhaatiirta haddu u yaqaannaan '***heredity diseases'***. Tusaale ahaan, dad iyo duunyaba cudurka la yidhaa ***sambab faraqa*** waa la kala dhaxlaa oo waa laysku dhalaa. Haddii sumal qaba cudurkaas, ido lagu daro, maqasha uu dhalaa kolka ay kobocdo baa la gubaa si aanu cudurkaasi u layn. Dadka koboca lalama sugo ee kolka uu ilmuhu dhashaba isaga oo uu xabki ka qoyan yahay ayaa laga gubaa oo la jeeniqaaraa (lagu sameeyaa ***jeeniqaar)*** [1]**.**

   Si cudurkaasi looga hortago waxa caado laga dhigtay oo la joojiyey isguursiga xigaalka. Tusaale ahaan, ilmaadeerrada iyo habarawadaaguhu ismay guursan jirin oo layskuma soo hoos noqonjirin. Ilmaabtiyadase waa la jideyn jirey. Haddase, taasi ma jirto waa laysku dhex biyo batalaqsaday.

2. Kubadhagaxawgu (***Constipation***) wuxu ka mid ahaa xanuunnada yaryar ee ay dadka Soomaaliyeed iska daweyn jireen. Dawooyinka loo yaqaan '*Laxactives*'-ku may jirin, hayeeshee kuwooda ayey la haayeen. Sida aan ku sheegay buugga la yidhaa: *Abwaanka cudurrada dadka iyo duunyada* waxay adeegsan jireen caleenta geedka loo yaqaan jaleelada. Caleenta oo la qallajiyey ayaa la bidhaa. Maraq bandanna waa lagu cabbaa. Geedku waa laba jaad oo la kala yidhaa *jaleelo geel* iyo *jaleelo adhi.* Waana geed gaab dhulka ku baaha. Midhahoodana waa la cunaa [2].

3. Dadka Soomaaliyeed waxa kale oo ay yaqaanneen, haddadanna yaqaannaan, inta reer magaalaw-dey mooyaane, in waabayda xamaaratadu dhiigga xinjiro ka dhigto oo kolka uu dhiiggu

xinjiroobo uu gufeeyo halbawlayaasha iyo haniyayaasha (***valves***). Taasina tahay ta keenta inuu qofku kolkiiba go'o. Si arrintaa looga hortago waxay samayn jireyn laba arrimood: Qofka oo la qaraariyo (la siiyo waxa hadda dhakhaatiirtu u taqaan ***Antidote***) iyo xubinta ugu dhow halka qofka laga qaniinay oo la xidho kadibna la toobo oo dhiiggii sumoobay laga soo nuugo.

4. Inkasta oo aanay aqoon ereyada '***germis iyo bacteria'***, haddana waxay ogaayeen inuu jiro cayayaan aanay indhuhu arkikarin oo cudurro dhaliyaa. Tusaale ahaan, waxay ogaayeen in cudurka indhaha ku dhaca ee la yidhaa ajarrada uu abuuro cayayaankaasi. Sidaasi awgeed cudurkaasi oo ah mid cuncun badan way dawayn jireen. Inta ay dhegyar oo curub ah ka soo jaraan dacarta ayey raranka ruubijireen kadibna ay indhaha labadooda baad kala dhexgelinjireen, sida ay ay haweenku maylinka u dhex mariyaan indhahooda kolka ay indha kuulanayaan.

   Geeljiruhu kolka ay aroortii hasha u horreysa soo godlaan waxay sameeyaan hadhuubka ayay gaaroodiyaan. Ujeeddada oo ah cabbaar bay hadhuubka kor hayaan dabka, taasi oo kuu cadday-naysa inay garanayeen inuu germis jiro oo ay iska ilaalinayeen dhibkiisa.

5. Dadka Soomaaliyeed waxay si yaab leh u yaqaanneen kaydinta cuntada (***food preservation***). Haddii aan wax yar ka binniixiyo, hadhuudhka dhawr siyood bay u kaydin jireen. Kolka la rabo in hadhuudhka oo bisil la qaato waxay ka dhigijireen waxa loo yaqaan ***saato***. Waa hadhuudhkii oo aan aad la bislayn oo inta gaws qabatin laga dhigay fuudkii laga miiray oo la qallajiyey, kadibna cusbo yar lagu bilay. Inta badan socotada ayaa qaadata. Kolka aanu hadhuudhku bislayn qodaalku (beerlaydu) waxay u kaydiyaan sida hadda reer galbeedku u kaydiyaan. Waxana lagu shibijirey meelo loo yaqaan *bukaaro* ama *boholo* qofba sida uu u yaqaanay.

   Hilibka dhawr siyood baa loo kaydiyaa ama loo kaydin jirey. Tusaale ahaan, mar waxa laga dhigaa kumbus, marna solay. Markale waxa laga dhigaa jabdhan. Kolkii la doonana waa la baruurafudleeyaa. Kolka la rabo in la muqumadeeyo (oodkac laga dhigo), marka hore waa la areerimaa hilibka (waxa laga dhigaa wax dhuudhuuban), markaasaa laydha iyo cadceedda loo dhigaa si uu u qallalo. Kolka uu sidii la rabay noqdo waa la muqumadeeyaa (waa la yaryareeyaa). Haddii la rabo in dhakhso loo cuno kolkaaba waa la shiilaa. Waxana lagu udgooneeyaa dhirta uu ka midka yahay dhigrigu. Ubbo iyo weelkii la rabo ayaa lagu dhigaa. Kolka la cunayo lama oggola in fandhaalka inta afka lageliyo haddana xeedhadii ama ubbadii ay muqummaddu ku jirtay lagu celiyo. Taasina waxay ka hortageysaa inaanay xumaan muqummaddu.

   Kolka la rabo in la kaydsho inta la shiilo ayaan subag lagu darin ee la cusbeeyaa uun. Marka ay qallashana weelkii la rabo baa lagu shubaa. Inta ay sidaa tahay waxa loo yaqaan ***qalawl****e*. Sideeda ayaa lagu bidhaa waana macaan oo afkaasi lagama qaado. Ammin doora baanay sidaa ku kaydsanaan kartaa.

6. Dhallinyaro badan baa u haysata inuu reer galbeedku inna baray xanjada la calashado (**the chewing *gum***). Haa tan sonkorta lagu soo dhammuuqay wuu innoo keenay. Waana markaynu tuurnay teennii. Waxan haddaba dhalinta u sheegayaa inaan lahaan jirney oo aan carruurnimadii

samaysan jirney xanjo. Tiraba anigu waxan aqiin oo aan yaraantaydii dheegan jirey saddex jaad ee idinkuna intiina ku soo dara. Saddexda aan dheegan jirey waxay kala ahaayeen: *Xanjado kidi*. Waxa laga dheegtaa xabagta kidiga. Waxaanay leedahay hah kulul. Ta labaad waxa laga dheegtaa caanayda *xangeeyada*. Ta saddexaad waa *xanjo fooxda* oo iyada maantadan meel kasta waa lagu calashadaa.

Waxa ii markhaati furay nin la yidhaa Siciid Axmed oo aannu magaalo wada deeggannahay. Wuxu ii sheegay inuu yaraantiisii isna xanjada ka dheegan jiray dhawr geed. Kuwasi oo kala ah: *qadhoonka, gurnada, iyo kabraraha*. Sida uu Siciid ii sheegay xabagta dhirtaasi ayey xanjo ahaan u calashanjireen.

7. Ka rog oo haddana saar, dad badan oo dibadaha jooga ayaa adeegsada dhuumo (***Straws***) laga sameeyey caag kolka ay cabbitaannada qaar iibsadaan. Waxaanay u haystaan inaanay Soomaalidii hore aqoon. Laygama sheekayn ee aniga ayaa yaraantaydii samaysan jirey oo adeegsanjirey dhuumo aan reer galbeed samayn ee aan anigu samaysan jirey kolka aan rabo inaan moqor biyo kaga cabbo. Inay dhuumahaasi jireen waxa kuu caddaynaysa maahmaahda Soomaaliyeed ee tidhaa: *Dhuun baa moqor iyo afba ka warhaysa*. Dhuunta laga hadlayaa maaha dhuunta hunguriga qofka ee waa dhuuntaasi moqorka biyaha lagaga soo nuugo. Waxa lays weydiinayaa sida uu Barwaaqo u samaysan jirey dhuumahaasi. Geedka xangeeyada oo ka mid dhirta la cuno aroortii inta ay qaboonada tahay ayaanu dhuunbaxsanjirney oo lafta intaanu ka saarno dhuunta ku cabbi jirney wixii aannu doono sida ciirta ama biyahaba. *Xangeeyada, xabakawga, faraxuunshada, gacayrada iyo marooraduba* waxay ka mid yihiin maadhka dhulkeenna ee ay carruurtu qadhaabato aroorta hore intaanay cadeeddu kululaan. Waxay leeyihiin dhadhan macaan iyo dhanaan isugu jira. Carruurtuna aad bay u jeceshahay.

8. Sida dharka loo maydho ma reer galbeedkaa inoo keenay? Saabuunta reer galbeedku intaanay inna soo gaadhin miyaynaan dharka iska maydhijirin? Haddaba, intaan ilbaxnimadeennii iyo aqoon-teenniiba laynaga faramaroojin, bahalana laynugu tilmaamin, dharkeenna waan dhaqan jirnay, saabuunteennana waan lahayn. Ereyga '*saabuun*' hadda ayuu inna soo galay ee teenna '*bood*' baa la odhanjirey. Sidaasi darteed dharka waa la boodaynjirey, taasi oo ujeeddadu tahay bood baa lagu maydhi jirey. Boodaysi haddii aad maqasho waa habkii ay Soomaalidu dharka u caddayn jirtey. Siciid Axmed baa isna ii sheegay in jiidda uu ku koray loo adeegsanjirey dhar dhiqidda dhirta kala ah: *dabayoodka, iyo gasaangaska*. Ka hore midhihiisa ayaa loo adeegsadaa saabuun ahaa. Ka kalana buruqdiisa ayaa la adeegsadaa.



Dharkase miyeynaan samaysan jirin? Waxan filayaa inaan la illoobin iskaashatooyinkii soo saarka dharkii la odhanjirey *Aliindiga* oo ilaa hadda la sameeyo.

9. Dhallintii hore ee Soomaaliyeed tolow miyaanay timaha casaysan jirin? Ma reer galbeed baa inna baray in timaha la casaysto? Hydrogen peroxide ($H_2O_2$) lama aqoon waana la casaysan jirey

timaha ee la soco. Dhawr siyood baa loo casaysan jirey. Dhallinta qaar deeb bay adeegsan jireen, qaarna xididka geedka la yidhaa gommoshaaga ayey adeegsan jireen.

10. Waxa aqoonta reer galbeedka ku cusub in hooyada isa sidata loo sheegikaro wiil iyo gabadh midka ay caloosha ku siddo. Maxaad u malayn haddii ay Soomaalidu aqoontaasi lahayd oo ay kala sheegijireen wiil iyo gabadh midka ay haweenayda uurka lihi siddo. Haddii uurku aad u weyn yahay oo ay hooyada isa sidataa aad u cuslaato waxay odhanjireen, 'Heblaayo doorkan way culustahay oo gabadh bay siddaa." Haddii Uurka hooyadu noqdo mid yar oo ay doorkan sidii hore ka fududaato waxay odhanjireen, "Heblaayo waxay siddaa wiil." Saadaashaasi way rumoobijirtey ama waa lagu hungoobijirey sida ay haddaba u jirto saadaal dhakhtar oo beenawday.

11. Qalliinka way samayn jireen. Haddii qof qodaxi muddo (ama falliidhba galo) oo ay ku fogaato lana soo saarikariwaayo, faraadin baa loo raadin jirey waana laga soo jeebi jirey. Lafaha inay kabijireen cid loo sheegayaa ma jirto. Waxase xusid mudan dhacdooyinkan hoos ku qoran:

    *Gaaxnuug Gaas Cali, Eebbe godka haw ifiyee, wuxu ahaa faraadin ku xeel dheer sida loo maareeyo dhibaato kasta oo xoolaha soo food saarta. Waxanan goobjoog u ahaa, isaga oo markaas uun ka soo fadhiistay awrkiisii gurgurqaad oo qooqay, dadcunna noqday, oo uu ciir faartay, oo intay dhawr habeen bariday kala baxday, uu ku shubayey si uu u da'furo, ayaa loogu soo qaliyey ri' dhali kariweydey kolkii uu ilmihi isgudbay. Anoo taagan buu Gaaxnuug ri'dii badbaadiyey kolkii uu ilmihii ku soo qalay.*

    *Aroor kale waxa Gaaxnuug loo sheegay in qaalin qaalmahii geela ku jirey ka midihi rimiweydey laba gu' oo is xiga loona baahna yahay in arrinkeeda la maareeyo. Gaaxnuug wuxu af buuxa ku yidhi, "Xubin lab bay leedahay ee berri aroor inta uu geelu bariisanayo ha la soo qabto waa la qalidoonaaye."*

    *Aroortii ballantu ahayd baa qaalintii la soo qabtay oo qalliinkii loo sameeyey. Gaaxnuug cad uu gudaha qaalinta ka soo jaray buu dadkii tusay oo uu yidhi, " Maxaan sheegaayey?" Cusbo ayaa ka mid ahayd waxyaalihii qalliinka loo adeegsaday. Kolkii uu Gaaxnuug hawshii ka faraxashay ayuu ku yidhi kuraydii geela jireysey, " Toddobaad kadib awrka ha loo tu'iyo." Sidii baa la yeelay, bil kadibna waxa la arkay qaalintii oo goojineysa. Waydiintu waxay haddaba tahay, Gaaxnuug qalliinkii ma **Harvard University** buu uga soo baxay? Mise aqoon jirtay oo ab ogaaya buu adeegsanayey?*

12. Halbawle markuu go'o ee uu dhiiggu hawda guro kolkiiba way joojin jireene ma ***Vitamin K*** bay adeegsan jireen mise aqoon kale ayaa jirtey? Dhirta ayey isku daweyn jireen. Geedka la yidhaa geed honnogga caleentiisa ayaa, deegaannada qaar, inta la daqiijiyo nabarka la saaraa markaasuu kolkiiba dhiiggu joogsadaa. Deegaanno kale baa geedka la yidhaa caweerka xididkiisa ama ka carmada u adeegsada joojinta dhiigga.

***13.*** Markanna bal aan dhanka qoraalka wax ka tilmaamo. Arday kastaa waxan filayaa inuu xasuusan yahay markii barahiisu u bilaabay habka cursika loo qoro. Anigu af Soomaali waxba kuma baran sidaasi awgeed ereyadii afkeenna ma garanayo ee waxan ku tilmaami af shisheeye. Tusaale ahaan

af Ingiriiska wuxu barahu innoo sheegay in kolka curis ( easy or composition) la qorayo loo kala saaro saddex qaybood oo kala ah: *Introduction, Body, and Conclusion.* (Carabtuna waxay tidhaa ( مقدمه - متن - خلا صه ) .

Haddii aan idhaa Soomaalidii hore habkaa way tiqiin waxa laga yaabaa inay dad isweydiiyaan oo yidhaahdaan oo waxba maynaan qorijirine sidee loo yiqiin? Maansada ayaa halka qorriinka innoogu jirtey. Sidaasi awgeed iyada ayaa laga helayaa habkii aan ka hadlayey ee bal u fiirso gabaygan uu tiriyey Cumar Xaaji Xuseen "Ustareeliya)

**Introduction** – Arar- مقدمه

*Dhudaa gabay haddaan Maxamadow dhuuxa ka abbaaro*
*Abidkayba xarafkaan dhigaa dhaxal-gal weeyaane*
*Anigoo dhallaanaan xafiday dhihitinkiisiiye*
*Caawuu gadhkaygii dhafmay uu dhabannaday buuxshay*
*Inuu xarafku iga dheelliyaa waa dhegxumo weyne*
*I dhegaysta caawana tix waan dhaabadayn jiraye*

**Body** متن Sabar

*A.* *Adhi waa dhallaan iyo haween dhimaradiisiiye*
*Dhaldhalaalka iyo ciirtu waa dhuubka karameede*
*Dhaqaalaha haweenkiyo guryaha siima dhaafsana'e*
*Lo'da dhiiqda laga maalayiyo dhayda iyo xoorku*
*Dhudhunkay biyaa kula jirtiyo dharabka weeyaane*
*Mar hadday abaaruhu dhacaan dhimatay geesleeye*
*Ragga laxaha sii dhawrayow dhaqasho waa geele!*

*B.* *Dhibaatiyo adoo gaajo qaba dhaxanta jiilaalka*
*Dhoor caano laga soo lisoo yara dhanaanaaday*
*Nin dhadhamiyey wuu garanayaa dhulay qaboojaane*
*Goortaad dhantaabaa jidhkaba dhidid ku qooyaaye*
*Ragga laxaha sii dhowrayow dhaqasho waa geele!*

**Conclusion** (gunaanad) خلا صه

Dhoorwiil u yeedhyeedh niman dhaqanine waa caydhe

Abwaannada qaar baa gabagabadooda si toosa kuu odhanaya:

*Waxba yaanu hadalku ila sii durkine waxan ku soo ooday*
……………………………………………………………

14. Dhanka aqoonta dhirta (Botany) haddii aan jalleecno, waxay Soomaalidii hore tiqiin hawsha ay xididdadu qabtaan. Tusaale ahaan bal u fiirso heestan ay qaadijirtey Magool:

*Dhirta xididka hoosaa*
*Dhulka loogu beeree*
*Way dhicilahaayeene*
*Dhismahooda weeyee*

15. Dhanka xisaabaha malaha inaan Soomaalidu aqoon baa loo haystaa. Kama hadlayo isu geynta iyo kala goynta ama isku-dhufashada iyo isu qaybinta ee waxan ka hadlayaa ta loo yaqaan ***Itimaalka*** (*Probability*). Tusaale haddii aan ka soo qaato buuggii xisaabta ee dugsiga sare bal u fiirso[3]:

*Sumadaha 'goobada iyo bisha' laguma dhigo halka av sawirka kaaa vaalliin.*

*Raabaqaad:* `Permutation`


*Kutirsaneyaasha ururka {a, b, c} waxaad u ratibi kartaa lix siyaalood oo kala duwan:*

| | | |
|---|---|---|
| *a b c* | *b c a* | *b a c* |
| *a c b* | *c a b* | *c b a* |

*Ratibaad kastaa waxay kaga duwan tahay tan kale horsiimada kutirsaneyaasha.*

Haddaan arrintaa barbar dhigno sida ay dadka Soomaaliyeed xoolahooda u suntanjireen waxad dareemaysaa inay habkaa mid u dhow ay yaqaanneen. Hayeeshee, ayagu umay aqoon ereyada aan kor ku xusay ee bal u fiirso.

Adhiga sumadda lagu dhigo waxa ka mid ah: *Dakhar, xariir, dhaad, dacal, fur, gawl, dheg-jeex, dheg-dalool,* iwm.





Siddeeddaa sumadood waxay ka samayn jireen sumado badan oo kala wada duwan. Tusaale ahaan:

1. *Dhakhar iyo xariir, dhakhar iyo dhaad, dhakhar iyo dacalo, dhakhar iyo fur.*
2. *Dhakhar iyo xariir iyo dhaad, dhakhar iyo xariir iyo dacal, dhakhar iyo xariir iyo fur*
3. *Xariir iyo dhaad, xariir iyo dacal, xariir iyo fur, dakhar iyo laba xariirood*
4. *Xariir iyo laba dhaad, xariir iyo saddex dhaad, xariir iyo laba dacalood, fur iyo laba xariirood, iwm.*

Sumadaha geeluna waa la mid, waxana ka mid ah kuwa sawirkan ka muuqda. Ujeeddada aan ka leeyahayna waa in laysla garto magaca sumadda iyo muuqaalkeeda.

1. Shax
2. Kabaal = Heensaraar
3. Barkin
4. Dhaad
5. Qalqale
6. Hawaar
7. Shumme
8. Faro
9. Gadh = Dildilo
10. Qanjagub
11. Hareed
12. Ganaf = Saneeg
13. Laanqayr



Lo'duna waa la mid. Waxa iyana sumadaheeda ka mid ah: *sakamad, heensaraar, far, shumme, mareeg, goobo, liin, taraar, dhaad* iwm.

Soomaalidii hore shirkado may lahayn. Sidaasi awgeed '***logo***' -da waxa loo yaqaan lama aqoon. Hadda oo aynu magaalawney ganacsina yeelannay haddii aan sumadaheenna galtibixinno oo u adeegsanno '*logo*' ahaan ma malaw baa inna koraya?

Weli xisaabtii baynu ku jirnaaye, sida aynu wax u beegijirnay baa iyana xusiddeeda leh. Hal wixii ka yar sidii aan ku beegijirray waxa si wacan loogu qeexay sheekada qayb libaax. Ereyaduna sidan bay ahaayeen [4]:

*Badh – ½, waax – 1/4, falladh – 1/8, rimic – 1/16, iyo miil – 1/32.*

16. Markanna aan eegno dhanka ciyaaraha loo yaqaan '***indoor & outdoor games'***. Ciyaaraha lagu madaddaashaa ma yara, hadday yihiin qaar dhallinyaro iyo hadday yihiin qaar waayeelba. Inta aan ilaa hadda soo ururiyey waxay kala yihiin [5]:

    *1. Bareer (ool-ool). 2. Beretan (cagatan). 3. Bilabileysi (Kumbudhlaysi; kowkow). 4. Bootaalaysi. 5. Caddalool (bad baa la jeexdaa; waana laysa seemaa) 6. Cuud. 7. Dabbaal. 8. Dhagadhagaysi. 9. Dhugtan. 10. Dhuumaalaysi (dhuudhuumashow).11. Durbaan. 12. Fataatiir (binniso, dhoojad. wixii ku daara. Xalaal maca taako. Igama qudhunto oo igama gubato. dhocori. Dugaadhaa. caraa'is.) 13. Gamsaro, [gamsaro, gamsaro (gordin), qaalin ha duulo, qaalin ha wareegto. Balooley iyo labadii rugtiyo raaskaba lahaa.] 14. Gariir. 15. Gocasaysi. 16. Googgaalaysi (googgaa; cigallee ama cadallee). 17. Habar-indhooley. 18. Hadaaf. 19. Helleeleysi. 20. Hurdan. 21. Jag (jagijagi). [ Cubbe.] 22. Kabey-bilataa. 23. Kabro ( xeego ). 24. Korubbooto. 25. Kowkow (kumbudhlaysi; bilabileysi). 26. Kumbudhleysi (kowkow; bilabileysi). 27. Leelo ( leelo goobaley geelu kugu yuus; cuur ) 28. Legden. 29. Luuf ( maani maadi ) 30. Malamalaytan ( maleelaysi ). 31. Maroodi cadhoole. 32. Muqlaysi. 33. Oolool ( bareer). 34. Riddo. 35. Shabadaan (baje) 36. Shanley. 37. Shantarad. 38. Shax. (irmaan; jare) 39. Shimbiri-dhakh. 40. Tamani. 41. Timirijabtay. 42. Tuuryo dhigasho. 43. Ul-xeer (booddada hoose). 44. Waalo. 45. Wareegacadde. 46. Xaafoo. 47. Xeego (kabro).48. Yooyootan.*

17. Waxa kale oo ay Soomaalidu tiqiin waxa loo yaqaan qorshaha qoyska (***family planning)***. Dad iyo duunyaba dhalidda aan qorshaha lahayn waa laga soo horjeedey. Haddii aan tusaale u qaadanno sida ay xoolaha ugu qorshayn jireen, runtii lama oggolayn in xoolaha laysku sii daayo xilli walba. Taasi oo ka hortegeysa inaanay xooluhu iska dhalin xilli aan habboonayn.

18. Laga dhammaan maayo ilbaxnimadeennii iyo aqoonteenniiye bal aan markanna eegno waxay Soomaalidu ka tiqiin aqoonta afafka ee loo yaqaan *linguistics*. Waxa jira laba dugsi oo ay kala hoggaamiyaan aqoonyahan u dhashay dalka *Swisserland* oo la odhan jirey ***Dr. Ferdinand De Saussure*** iyo aqoon yahan Maraykan ah oo la yidhaa ***Dr. Noam Chemosky.*** Xubnaha dugsiga

hore waxay rumaysan yihiin in kolka ay carruurtu dhalato ay maskaxdoodu tahay sidii sabuurad madhan oo kale (***Blank slate or Tabula Rasa*** ) oo kolba afka lagu qoro uun uu ilmuhu barto. Waxana aqoon yahannada dugsigaa ka tirsan loo yaqaan '***structuralists***'. Dugsiga kale xubnaha ka tirsani waxay rumaysan yihiin inaanay maskaxda carruurtu madhnayn kolka ay dhashaan ee ay ku dhashaan qalab diyaar ah oo kolba afkii la lala rabo inuu barto uu la qabsado. Waxana aragtidaa loo yaqaan '***innate***'.

Waxan haddaba xasuustaa hooyooyinkeen oo kolka ay aayo carruurta saygeedu ula yimaaddo xurgufi dhexmarto ku waaniya oo yidhaa, " Naa carruurtu waa ***weel madhan*** oo kolba waxaad ku shubato ayuun buu kuu hayaa, ee carruurta wanaajiso oo si fiican ula dhaqan. Ayaguna hadhaw bay ku wanaajine." Aragtidaasi miyaanay la mid ahayn tii dugsiga hore ee aqoonta afafka ee ***Dr. Ferdinand De Saussure*** madaxda u yahay?

19. Aqoonta kale ee ay dadka Soomaaliyeed yaqaanneen waa adeegsiga farriimaha qarsoon, taasi oo afka qalaad loo yaqaan ***'Encryption'***. Tusaale cadna waxa inoo ah dhacdooyinkan hoos ku qoran [6]:

*A. Raage Ugaas Xuseen wuxuu ka dhashay qoys xooloraacato ah. Yaraantiisii buu tegey reer koodii oo aaday wadaad xer ku hayay degmo kale oo fog si uu u barto diinta. Sanooyin badan buu inanku ku maqnaa xeraysi. Berigii dambe baa Raage wuxuu la kulmay niman uu yaqaan oo u socda degmadii adoogiis joogay, wuxuuna weyddiistay in ay gaadhsiiyaan farriin. Wuxuu yidhi:*

*- Aabbahay u sheega inaan shanta salaadood ku wada tukado weyso-qaad keli ah.*

*Nimankii farriintii bay u sheegeen Raage adoogiis, isaguna wuxuu ku yidhi:*

*- War, i soo mara markaad ku noqonaysaan reerkiinnii. Alaabo baan idiinku sii dhiibi doonaa wiilkaygiiye.*

*Beryo kaddib bay nimankii ku soo noqdeen reerkii Raage aabbihiis sidii uu ka codsaday. Wuxuu nimankii u dhiibay soddon cad oo hilib shiilan ah iyo tebbed subag ka buuxo.*

*- Waxaad wiilkayga ku tidhaahdaan: "Bishu waa soddon, balliguna waa buuxaa," - buu yidhi aabbihii.*

*- Intii ay sii socdeen bay nimankii in badan ka cuneen hilbihii iyo subaggii, intii hadhayna Raage ayey u geeyeen, waxayna u sheegeen farriintii adoogiis u soo diray.*

*- Adoogay wuxuu ii soo diray soddon cad oo hilib ah iyo tebbed subag ka buuxo, waxaadna ii keenteen toban cad oo keli ah iyo in yar oo subag ah. Waa inaad i wada siisaan alaabadaas oo dhan, - buu Raage ku yidhi nimankii inta u fasiray macnihii dahsoonaa ee farriintii aabbihiis.*

*B. Dugsigii u horreeyey ee Burco laga furo waxa maammule looga dhigay Yuusuf Ismaaciil Samatar. Xilligaasi dadku si aad ah bay uga soo horjeedeen waxbarashada. Sagaal bilood markuu dugsigii furnaa tiradii ardaydu waxay dhaafi waydey saddex arday oo qudha. Sida la sheegay, maalin walba ardadaa jidka ayaa lagu sii dili jirey. Maalin dambe ayaa arday ka mid ah saddexdii arday gacan laga jebiyey. Yuusuf oo arrintaa ka xun baa ogaaday gaadhi u baxayay Hargeysa. Waxaanu warqad ugu sii dhiibay Maxammuud Axmed Cali iyo Yuusuf Xaaji Aadan oo kolkaasi Hargeysa ku sugnaa.Isaga oo, haddaba, adeegsanaya farriin qarsoon buu warqaddiisii ku yidhi [7]:*

> *"Rabbii lnnii Dacawtu Qawmii Laylan Wanahaaran, Falam Yazid hum Ducaa'ii illaa Firaaraa."* [8] قَالَ رَبِّ إِنِّى دَعَوۡتُ قَوۡمِى لَيۡلاً۬ وَنَهَارً۬ا (٥) فَلَمۡ يَزِدۡهُمۡ دُعَآءِىٓ إِلَّا فِرَارً۬ا (٦)
> *Ujeeddadu waxay ahayd inuu tilmaamo siduu quus uga joogo waxbarasho laga hirgeliyo magaalada Burco. Warcelintii uu helayna waxay ahayd: "Asbur Kamaa Sabara Uulul Casm Min Al Rusul. "* [9] *فَٱصۡبِرۡ كَمَا صَبَرَ أُوْلُواْ ٱلۡعَزۡمِ مِنَ ٱلرُّسُلِ* *Taasi oo ujeeddadeedu tahay u dulqaado sidii ambiyadii la doortay.*

Guntii iyo gebagebadii, aqoonteenna iyo ilbaxnimadeennu kama liitaan kuwa reer galbeedka waxase loo baahan yahay in la galtibixiyo. Sidaasi baanan waxba ka odhan xiddigiskii iyo saadaashiiba.Waxanan leeyahay waa la doogiye yaan la dacaroon.

## Raadraac


1 & 2. Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo'. *Abwaanka cudurrada dadka iyo duunyada,* published by the author, Ottawa, 2001.

3. Wasaaradda waxbarashada ee Soomaaliya. Xisaabta dugsiga sare, fasalka afraad

4. Dr. Georgi Kapchits. *Waxaa la yidhi – Sheekooyin hidde ah*, Omimee Intercultural publishers, Cologne, 1996, bogga 44aad

5. Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo'. *Ciyaaraha Soomaalida*. **HAL-AQOON** *Xidhmada III^aad^, tirsiga 1^aad^,2^aad^, 3^aad^ Jen./Diis. 2003 / Vol.III, No.1,2, and 3, Jan../Dec. 2003*

*6.* Dr. Georgi Kapchits. *Waxaa la yidhi – Sheekooyin hidde ah*, Omimee Intercultural publishers, Cologne, 1996, bogga 127

7. Fawzia Yuusuf X. Aadam. *Geeddi Nololeedkii Yuusuf X. Aadam*. Aftahan publications, London, 2007

8. Suurat Al-Nuux, aayadda 5aad iyo 6aad.

9. Suurat Al- Axqaaf, aayadda 35aad

10. Fu'ad Sh. Abu Bakar, bahda http://www.farshaxan.com

11. Waxa iga kaaliyey dhanka sumadda lo'da Cabdirizaaq Aw Yoonis iyo Maxamuud Y. Ducaale oo loo yaqaan 'Diktoorka'.